Tallaalka influensada sannadlaha looga hortago ee haweenka uurka leh loogu talagalay

Influensada waxay badi ahaan ku dhacdaa haweenka uurka leh haddii la barbardhigo dumarka aan uurka lahayn, tan kale haweenka uurka leh waxay halis sare ugu jiraan inay si xun u xanuunsadaan, waxaana suurtagal ah halis dheeraad in u ku dhaco cudur halis ah xilliga uur-qaadista. Maadaama cudurka daran uu sidoo kale halis u yahay uurjiifka, waxaa haweenka lagula talinayaa in ay is-tallaalto oona badbaadiso uurjiifka.



Talo soo jeedin loogu talagalay haweenka uurka leh

- Haweenka uurka leh ee ku sugan bilaha 2:aad iyo 3:aad waxaa lagula talinayaa inay influensada iska tallaalaan kahor xilliga qaboowaha.
- Haweenka uurka leh ee ku sugan 1:aad waxaa lagula talinayaa inay influensada iska tallaalaan xitaa haddii aad ay ka tirsan yihiin kooxaha kale oo laga ilaaliyo halisyada.

Talo soo jeedinta waxay khuseysaa xilliga dayrta iyo qaboowaha 2025/2026.

Badbaadinta hooyada

Cilmi-baaris waxaa lagu muujiyay in haweenka uurka leh iyo dadka waaweyn ee kale ee caafimaadka qaba tay badbaado heer sare ka helaan tallaalka.

Warbixin faahfaahsan ka akhriso barta internetka: fhi.no/voksenvaksinasjon

Wuxuu badbaadiyaa ilmaha

Haddii dhallanka ay influensada ku dhacdo si halis ah ayuu ugu xannuunsan karaa haddii la barbardhigo caruurta iyo dadka waaweyn. Tallaalka waxtar wayn ayay hooyada ka heleysaa xilliga uur-qaadista kuna uurjiifka.Cilmi-baaris waxaa lagu muujiyay in tallaalka influensada ee xilliga uur-qaadista uusan kordhinayn khatarta dhicisoobida, dhalashada hormarsan ama dhaawaca uurjiifka.

Ku saabsan tallaalada

Tallaalka wuxuu ka kooban yahay hal qiyaas. Maaddada kuma jiraan fayras nool sidaas darteedna ma sababi karo cudurka influensada. Tallaalka influensada loogama badbaado fayrasyada kale iyo bakteeriyada keeni kara calaamado la mid ah.

Waxyeellooyinka

Qof kasta ma dareemo waxyeellooyinka tallaallada, inkastoo dhammaan tallaallada ay sababi karaan waxyeellooyin. Waxyeellooyinka ugu badan ee tallaalka influensada waxaa kamid ah danqasho, guduudasho iyo barar goobta lagu duray iyo sidoo kale qandho, dareen jirro, daal iyo muruq-xannuun.

Waxyeellooyinka halista ah iyo falcelinta xasaasiyadda aad bay u yar yihiin tallaalka influensada kadib. Haddii aadan hubin wax calaamado ah ama muddada ay qaadan karaan tallaalka kadib la xiriir dhakhtarkaaga.

Halkee tallaalka influensada iyo fayraska korona ka heli karaa? La xiriir umulisadaada, dhakhtarkaaga ama bogga internetka ee dowladda hoose.

FHI